FSAU
Qaybta Falanqaynta Hubinta Cuntada ee Soomaaliya

# Hubinta Cuntada & Nafaqada

Waxa la soo saaray
23ka Bisha 7aad , 2008

## Warbixin Gaar ah – Oo Fiirada Saaraysa Digniin Hore ee Xiisad ka sii Daraysa

Cimilada
Colaadda Sokeeye
Beeraha
Xoolaha
Suuqyada
Nafaqada

### ARRIMAHA UGU MUHIIMSAN


Inkasta oo natiijooyinka qiimaynta la sameeyay xilliga Guga ka dib aan la soo saari doonin inta ka horraysa bisha 8aad, haddana waxa cad **in tirada guud ee dadka u baahan gargaar bana-aadamnimo ay kor uga kici doonto tirada hadda ee ah 2.6 malyuun inta lagu jiro lixda bilood ee soo socda. Haddii ay timaaddo xaaladda ugu xun ee dhici kartaana tiradu waxay gaari kartaa 3.5 malyuun qof dhamaadka sannadka.** Arrintan waxa keenaya saamaynta ka iminaysa arrimaha isbiirsaday ee roobabkii Gu'ga oo liitay, qiimaha cuntada oo lagu wado inuu sii kordhayo, qiima dhaca lacagta ee sii socda iyo collaadda iyo nabad **la'aanta sokeeye** ee sii korortay. Inkastoo soosaarka dalagga ee gobolka Baay iyo qaybo ka mid ah gobollada Shabeellooyinku la filayo inay wax ka tari doonaan dhibaatooyinka xagga fursad-u-helidda cuntada ka haysta bulshooyinka beeralayda, hase yeeshee saamaynta guud ee uu ku yeelan doono qiimaha cuntadu ma weyna. Waxa la filayaa in qiimaha cuntadu lagu wado in uu sii kordho, sidaas darteed fursad-u-helidda cuntadu way ku sii adkaan doontaa illaa bisha 12aad ee sannadkan qoysaska ku tiirsan wax ka iibsiga suuqyada oo ay ku jiraan dadweynaha magaalooyinka, saboolka deggan dhulka miyiga ah, xoola-dhaqatada iyo dadka soo barkacay.

__Abaarta ay qotadeedu sii dheeraanayso iyo Gurmadka Bina-aadamnimo ee ka jira gobollada Dhexe, Hiiraan iyo Bakool:__ Tirada dadka ku jira **Gurmad Bina-aadamnimo** waxa lagu wadaa inay sii kordhayso gobollada ay abaartu saamaysay ee dhexe, Hiiran iyo Bakool oo mar kale ann helin roobab, xilligan oo ah kii afraad ee xilliyo is xiga oo aan roobab la helin. Arrintan waxa xaqiijiyay warbixinaha nafoqada ee dhowaan soo baxday oo muujinaya iney laban-laabantay tirada carruurta ay nafoqa-darro xumi hayso ee la geeyey xarumaha quudinta iyo nafaqaynta saddexdii bilood ee u dambeeyey magaalada Dhuusamareeb ee gobolka Galgaduud. Biyaha iyo daaqa oo aad u yaraadayna waxay keeneen guuri-taan weyn oo xoolaha iyo dadka ah – kaasoo saamaynaya ilaa 50% deegaanka xoola-dhaqatada - oo iminka isugu uruuraya dhulka leh biyaha joogtada ah. Gobolada dhexe badi ceelasha ay biyuhu ku hadheen waxa lagu hayaa culays awoodooda ama mugooda ka weyn taasoo ay u sabab tahay dayactir iyo qalab la'aan. Qiimaha shiidaalka oo sarreeya ayaa sii kordhinaya qiimaha iibka biyaha oo hadda ka sarreeeya sida caadiga ah boqolkiiba 300 ilaa 1000 (caadi ahaan qiimaha foostada qaadda 200 oo litir waa ShSo 10,000 laakiin hadda waa ShS0 30,000 ilaa 100,000). Xaalada jirka xoolaha, soosaarkooda/nafcigooda iyo qiimahooduba aad ayay hoos ugu dhaceen iyadoo awrta rareyda ah iyo xoolaha yaryari ay dhimanayaan. Badi xoola-dhaqatadu umay harin xoolo tayo wanaagsan leh oo la dhoofin karo waxaana ay billaabeen inay iibiyaan xoolaha dhaqmaadka ah, iyagoo isku dayaya inay bixin karaan qiimaha biyaha iyo cuntada ee aadka u kordhay. In deyn ama amaah wax lagu iibsadaa way xaddidan tahay sababta oo ah heerarka deynta oo hore u sarreeyay iyo abaarta dabada dheeraatay darteed. Maaddaama roobabka kuwan xiga aan la fileyn ka hor bartamaha bisha 10aad, xaaladdu waxay ku wadi doontaa inay sii xumaato haddii aan la samayn wax-qabadyo bina-aadamnimo iyo kuwo lagu taageerayo heerarka hab- nololeedka.

__Xiisadda Qiimaha Cuntada ee Haysata Qoysaska ku Tiirsan Wax ka Iibsiga Suuqyada.__ Qiimaha cuntada gudaha iyo ta dibedda laga keenaaba wuxuu gaaray heerkii ugu sarreeyey ee taariikhda la diiwaangeliyey, welina wuu sii kordhayaa. Dad ay tiradoodu sii kordhayso oo jooga miyi iyo magaalaba ayaa gelaya xaaladda ah **Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeedka ah oo Aad u Xun (XCHAX)** iyo **Gurmad Bina-aadamnimo (GB)**, maddaama aanay awoodi karin inay u adkaystaan qiimaha cuntada ee sii kordhaya kaasoo si weyn u wiiqay awoodoodii wax iibsiga. Qoysaska saboolka iyo kuwa dakhligoodu uu dhexdhexaadka yahay waxay ku jiraan deyn culus, waxaana ay ku dhaqmayaan xeelado adag oo ay ugu adkaysanayaan dhibaatooyinka, kuwaas oo ay ku jiraan in cuntada xilliyada qaar la dhaafo, inay dawarsadaan ama tuugsadaan, inay iibiyaan hantidooda waxsoosaarka leh iyo inay guuraan.

__Xaaladda Nabad gelyo darro oo ah tii ugu Xumayd 17kii Sano ee la soo Dhaafey.__ Soomaaliya iminka waxaa soo food saartay xaalad nabad gelyo darro tii ugu xumayd toddoba iyo tobankii sano ee la soo dhaafay, iyadoo ay sii kordheen colaadaha hubaysan iyo dagaallada, weerarrada lagu bartilmaameedsanayo shaqaalaha gargaarka, ciidamada hubaysan oo la dhisayo, burcadnimada ku abbaaran maraakiibta oo sii korortay iyo xiisad siyaasadeed. Xaaladdani waxay si xun u mija-xaabinaysaa howlaha dhaqaalaha iyo gudbinta gargaarka bina-aadamnimo, sidaas darteedna waxay sababaysaa **inay ka sii darto xaaladda bina-aadamnimadu.**

__Heerar Gurmad ah oo Nafaqa-darro Xun ah ayaa lagu wadaa in laga soo sheegayo qaybo badan oo ka tirsan gobollada Koonfurta iyo Dhexe ee Soomaaliya.__ Iyadoo ku salaysayn natiijooyinka ka soo baxay baadhitaanno la sameeyey sannadkan 2008ka qiyaastii 180,000 oo caruur ah ayaa la rumaysan yahay inay hayso nafaqa-darro xumi, in ka yar saddexdii meloodba hal ayaa fursad u haysta daryeel habboon. Tiro sii kordhaysa oo ah carruur ay nafaqa-darro aad u xumi hayso ayaa iyagana laga soo sheegay goobaha ay abaartu saamaysay ee gobolka Galgaduud halkaasoo hay'ada ACF ay sida la sheegay laban laabtay howlaheeda muddo ka yar 3 bilood gudahood.




Wakhtiyada Xilliyada Soomaaliya iyo Dhacadooyin Muhiim ah

**Cinwaanka:**
**FSAU - Somalia**
**Kalson Towers, Parklands**
**Box 1230 Village Market**
**Nairobi, Kenya**
**Tilifoonka:**
**+254 20 374 5734**
**Faakiska:**
**+254 20 3740598**
**Iimayka:**
**fsauinfo@fsau.or.ke**
**www.fsausomali.org**

***Saamaynta waxqabadka:***

- ***Wax qabadyada kor loogu qaadayo goobaha ay ka howlgelayaan hay'adaha bani-aadanimadu si loo hubiyo in tiro badan oo dadweynaha ah oo dhibaataysani inay helaan gargaar.***
- ***Dardar gelinta (Kor u qaadidda) 'gargaarka bina-aadamnimada ee gurmadka ah, si loo badbaadiyo nolosha dadka gobollada koonfurta iyo dhexe ee Soomaaliya***, gaar ahaan goobaha sida xun u saamoobay ee ay hayso abaartu (Gobollada dhexe, Hiiraan iyo Bakool) iyo sidoo kale gobollada Shabeelada Dhexe iyo Shabeellada Hoose, oo ay joogaan tirada dadka ugu badan ee u baahan gargaar.
- ***Dardar gelinta (kor u qaadidda) 'taageerada hab-nololeedka' ee la siinayo xoola-dhaqatada jooga goobaha ay abaaruhu saameeyeen ee ka tirsan gobollada dhexe, Hiiraan iyo Bakool si loo ilaaliyo, loogana hortago in si buuxda ay u lunto hantida hab-nololeedku,*** tan waxa ku jiri karta taageero hore loogu marinayo helitaanka biyaha, laguna dhimayo qiimaha biyaha sida dayactirka iyo helitaanka qalabka matoorka ee ceelasha biyaha ka soo qaada, kabidda qiimaha shiidaalka iyo biyo dhaaminta. Tallaabooyinka kale ee taageerada hab-nololeedka ee waxtarka leh waxa ku jiri kara wax-qabadyada caafimaadka xoolaha, fududaynta deynta, iyo in xoolaha itaalka daran lagu iibsado qiime dhexdhexaad ah.
- ***'Taageero hab-nololeed gurmad ah oo la siiyo dadweynaha saboolka ah iyo kuwa ugu nugul ee ku nool magaalooyinka*** ee aan awoodi karin inay u adkaystaan qiimaha cuntada ee cirka isku shareeray ee isla markaan awooddooda wax iibsigu ay hoos u dhacayso, waxana taageeradaas ka mid noqon kara barnaamijyo waxqabada guud ah oo ay dadku howsha ku qaataan lacag ama cunto, fududaynta deynta iyo barnaamijyo loogu talagalay in dadka lagu badbaadiyo
- ***Waxqabadka 'taagero hab-nololeed ah' oo laga sameeyo goobaha sida cusub u gelaya xaalad ah Xiisad Cuntada iyo Hab-nololeed oo Aad u Xun (XCHAX) ee ka tirsan dhulka xoola-dhaqatada ee Waqooyi*** oo ay ku jiraan qaybo ka tirsan Hawdka gobolka Togdheer iyo Hargeysa, Dooxada Nugaal iyo Sool. Waxqabadyada taagerada hab-nololeedka ah ee loo baahan yahay waxaa ka mid ah biyo dhaamis, deyn fududayn iyo xannaanada xoolaha.


**ARRIMAHA UGU MUHIIMSAN EE QAYBAHA**

*xog-kooban*

- **Cimilada** - Roobabka Gu'ga aad bay ugu liiteen dhammaan goobihii ay abaartu saamaysay ee ka tirsanaa gobollada dhexe, Hiiran iyo Bakool, roobabkaasi way ka hooseeyeen xadigii caadiga ahaa. Dhulka xoola-dhaqatada muhiimka u ah ee waqooyiga oo ay ku jiraan qaybo ka tirsan Sanaag, Togdheer, Sool iyo Nugaal. Qaybo ka mid ah gobollada Jubbooyinka, Gedo iyo Bay ayaa helay roobab wanaagsan, iyadoo goobaha qaargood ee gobollada Shabeellooyinka oo roobabka Gu'gu ay liiteen ay ka faa'iidaysteen roobabkii xagaaga oo hore u soo maray isla markaana ahaa kuwo muddo da'ayay caadina ka sarreeyey (bishii 6aad illaa bishii 8aad).
- **Beeraha -** Natiijada kama dambaysta ah ee qiimayntii xilliga Gu'ga waxaa la soo saari doonaa dhamaadka bisha 8aad, hase yeeshee, tilmaamaha hore waxay muujinayaan in guud ahaan wax-soosaarka dalagga la filayo inuu caadi ka hooseeyo, inkastoo laga yaabo inuu ka roonaado sidii markii hore la filayay. Warbixinaha Gobolka Bay waxay muujinayaan in wax-soo-saarku uu caadi ku dhowyahay sababtoo ah waxa la kordhiyey dhulka wax laga beeray. Gobolka Shabeellada Hoose wuxuu ka faa'iidaysan doonaa roobabkii xagaaga oo keenay in dalagga xilliga caadiga ah ka baxsan la jari doono bisha 9aad illaa bisha 10aad. Qiimaha dalaggu wuxuu joogaa heerarkii ugu sarreeyey ee la diiwaan geliyey welina wuu sii kordhayaa. Iminka, xitaa masaggada/haruurka ayaa ka qaalisan bariisku siduu ahaa horraantii sannadkii 2007. Isticmaalka gallayda xabuuqa/xasiidda ah wuu fiday waxaana la filayaa inuu sii socon doono, abuurka xilliga caadiga ka baxsan dartiis. Tani waxay faa'iido u tahay isticmaalka qoysaska, laakiin waxay dhimi doontaa wax-soo-saarka guud.
- **Colaadda Sokeeye –** amni-darradu waxay qasaysaa howlaha dhaqaalaha iyo ganacsiga, isla markaana waxay xaddidaysaa fursad-u-helidda gargaarka bina-aadamnimada taasoo sii kordhinaysa saamaynta xiisadda qiimaha cuntada ee saraysay iyo abaarta. Fursad-u-helidda gargaarka bina-aadamnimadu kuma filla fulinta baahida sii kordhaysa ee bina-aadamnimada. Dilka iyo afduubidda howlwadeennada hay'adaha gargaarka, howlaha ciidmada iyo malayshiyooyinka oo la sii kordhiyey, iyo caga jugleynta lagu hayo hay'adaha gargaarku waxay aad u adkaynayaan jawaab-celinta waxqabad waxaana ay keeneen in howlaha qaar la joojiyey.
- **Suuqyada** – Qiima dhaca Shillin Soomaliga waa mid walaac aad ah leh, wuxuuna keenayaa inuu kordho qiimaha badeecadda dibedda laga keeno oo ay ku jiraan cuntooyinka qaar iyo shidaalku. Saamaynta qiima dhaca Shillinka Soomaaligu wuxuu taabanayaa dhammaan bulshooyinka ku nool miyiga iyo magaalooyinkaba.
- **Xoolaha** – Xaaladda hubinta cuntada iyo nafaqada ee dhulka xoola-dhaqatadu waxay tahay mid ka sii daraysa. Gobollada dhexe, xaaladda jidhka, wax-soo-saarka iyo qiimaha xooluhu waxay ku socota mid sii xumaanaysa, waxaana la soo sheegayaa in ay xoolo dhinteen daaqa oo gabaabsi ah iyo cudurrada oo sii kordhay dartood. Biyo yaridu waxay keentay in si buuxda looga guuray tuulooyinka qaar, iyadoo ay xoolaha iyo qoysasku isugu uruureen goobaha leh biyo joogto ah ama ceelal. Koonfurta waxaa ka jira hayaan aan caadi ahayn oo loogu guurayo dhulka webiyada. Qaybo ka mid ah Togdheer, Sool, Sanaag iyo Nugaal, xiisad cusub ayaa ka soo shaac baxaysa roobka oo liitay darteed, taasoo keenaysa in dadku ay si aan caadi ahayn u guuraan iyo biyo dhaamis xilligiisii ka soo hor maray.
- **Nafaqada –** Natiijooyinka ka soo baxay 13 baaritaan oo nafaqada ah oo la sameeyey sannadkan 2008 waxay muujinayaan in xaaladda nafaqadu ay ka sii dartay qaybo ka mid ah gobollada Bakool iyo Gedo, goobahaas oo laga soo sheegay heerar **Aad Halis u ah** oo ka sarreeya 20% oo ah nafaqo darro xun. Heeerarkaas **Aad Halis u ah** waxaa kale oo laga soo sheegay dadka ku barakacsan Galkacayo iyo Garoowe. Waxaa iyana walaac weyn laga qabaa gobollada dhexe ee abaartu saamaysay, goobahaas oo qiimayn degdeg ahi ay muujinayso inay sii kordhayso tirada carruurta ay nafaqo-darro xumi hayso, taasoo ay sii xaqiijiyeen heerarka sii kordhaya ee tirada carruurta la dhigo xarumaha quudinta iyo nafaqaynta. Tiradaas korortay waxaa kale oo ay ka muuqataa magaalooyinka sida Muqdisho, Wajid iyo Galkacayo.


# FALANQAYNTA QAYBAHA

**Khariidadda 1: Roobabka Xilliga Guga oo ah Boqolkiiba Sida Caadiga ah (1da bisha 4aad –30ka bisha 6aad ee '08)**




Soo Saare: FSAU/FEWS NET


**Khariidadda 2: Isbeddelka Cagaarka Dhulka oo loo eegayo Celceliska Muddada Dheer, Bisha 6aad ee 2008**




## CIMILADA

Marka laga reebo dhulka xoola-dhaqatada ee Jubbooyinka, qaybo ka mid ah gobolka Gedo oo soohdin la leh dalka Kiiniya iyo qaybo ka tirsan gobolka Bay, roobabka xilliga Gu'ga ee sannadkan 2008 sed-dex toddobaad ayay dib u dhaceen ama soo daaheen, hore ayaanay u dhammaadeen bishii 5aad, guud ahaan sida ay u da'eenna way liidatay. Badi goobaha ay abaartu saamaysay ee Bakool, Hiiraan iyo gobollada dhexe, inkastoo sawirka dayax-gacmeedku uu muujinayo in roobab wanaagsani ay da'een (daruuraha dartood) haddana warbixinaha gudubu waxay xaqiijinayaan in guud ahaan roobabki Gu'ga ay aad liiteen

**Jaantusta 1: Isbeddelka Cagaarka Dhulka ee Midhaha Roobka Ku Baxa ee Shabeellada Hoose 10kii Bishii 7aad ee 2008**




Soo Saare: JRC-MARS

Goobaha kale ee roobabkii Gu'gu ay liiteen waxaa ku jira, gobollada waqooyiga ee xoola-dhaqatada muhiimka u ah sida Sanaag, Togd-heer, Sool iyo Nugaal, gobolladaas oo biyo iyo daaq yaraan halis ah laga soo sheegay. Waxaa ka reebban goobo kooban oo ka tirsan hab-nololeedka Cadduun ee gobolllada dhexe, badi gobolka Bari iyo qaybo ka mid ah Nugaal, Awdal iyo Hawdka Hargeysa oo roobabku ay si caadi ka sarraysa u da'een (Khariidadda 1). WaqooyiGalbeed, inkastoo roobabka Gu'gu ay badi caadi ka hooseeyeen oo ay saameeyeen wax-soo-saarka dalagga abuurkiisa iyo goyntiisu ay gaaban tahay, waxaa la soo sheegay in roobabka socda ee Karantu ay aad u wanaagsan yihiin gaar ahaan degmooyinka beerallayda ee Gabilay, Hargeysa iyo Boorame.

Koonfurta, roobabka Xagaaga oo u da'ay si siman oo caadi ka sarraysay gobollada Jubbooyinka, qaybo ka mid ah Bay iyo Shabeellooyinku waxay wax weyn u tareen dhul daaqsimeedka. Gobolka Shabeelada Hoose, roobab badan oo qiyaastoodu u dhaxayso 20 – 80mm ayaa helay 40 maaalmood oo isxigay (20kii bishii 5aad – 30kii bishii 6aad). Waxaa kale oo ka da'aya roobabka Xagaaga oo aad u fiican oo soconaya illaa bisha 7aad. Inkastoo sawirka dayax-gacmeedka lagu qaaday aanu muujin tan, haddana warbixinaha ka imanaya gobolka waxay muujinayaan in roobabkaasi ay waxa u tareen dalaga taagan ee weli baxaya, oo ay keeneen inuu aad u kordhay dhulka laga beeray galleyda xilliga caadiga ah ka baxsan. Roobabka Xagaaga ee wanaagsani waxay ka tarjumayaan hagaaga xaalada huga dhulka sida u muujino sawirka dayax-gacmeekda ee Isbeddelka Cagaarka Dhulka (Khariidadda 2).

## COLAADDA SOKEEYE

Xaaladda nabad gelyada ee qaybo badan oo dalka ah, gaar ahaan koonfurta iyo gobollada dhexe waxa lagu waddaa inay ka sii darayso. Colaadda sokeeye waxa lagu waddaa inay sii kordhayso, iyadoo ay sii badanayaan shilalalka afduubka, dilka, colaadda hubaysan iyo xiisadda siyaasadeed bishii la soo dhaafay. Xaaladda nabadgelyo darrada ee hadda taagan waxaa la xaqiijiyey inay tahay tii ugu xumayd 17kii sano ee la soo dhaafay. Heerkan nabad gelyo darrada ee sii korortay wuxuu carqalad ku yahay howlaha dhaqan-dhaqaale, waxaana uu xaddidayaa fursad-u-helidda bina-aadamnimada taasoo sii xumaynaysa saamaynta qiimaha cuntada ee kacay iyo abaarta. Dilka howl-wadeennada hay'adaha gargaarka bina-aadamunimada ee Muqdisho, Hiiraan, Galgaduud, Baay iyo Jubbada Hoose iyo dhacdooyinka afduubka howl-wadeenada gargaarka bina-aadamnimadu waxay sii kordhisay halista nabadgelyo-darrida ka iminaysa, waxaana ay aad u sii adkaysay howlgalka hay'adaha gargaarka

bani-aadaminimada. Jawi badbaado leh oo ay hay'adaha gargaarku ku shaqayn karaan wuu sii yaraanayaa, hay'ado badanina horeba howlahoodii way u joojiyeen. Hadda, fursad-u-helidda bina-aadamnimada ee koonurta iyo Gobolada dhexe ee Soomaaliya kuma filla inay fuliso baahida sii kordhaysa ee loo qabo gargaarka bina-aadamnimada.

Fursad-u-helidda suuqyada iyo isgaarsiinta gaadiidku si weyn ayay u qasan yihiin sababta oo ah waxa sii kordhay howlaha ciidamada hubaysan, nabadgelyo-darrada iyo colaadda tan iyo billowgii bisha 7aad. Waxaa aad u sii kordhay tirada jid-goynta aan sharciga ahayn iyo dhacdooyinka dhaca iyo baadda laga qaadayo dadka goobaha **ay Xiisadda Bina-aadamnimadu** ka jirto ee gobollada Hiiran iyo Galgaduud, iyadoo shirqoolka dilka ah ee ku aaddan ganacsatadu uu sii kordhinayo joogitaanka malayshiyada ee goobahaas. Puntland, colaadda ka dhaxaysaa qabaa'ilka ayaa ka socoda oo ku lug leh dil shirqool ah oo ku aaddan dadka qaar.  Iska hor-imaadyada hubaysan ee sii kordhaysa siina socotaa waxay taaban doontaa suuqyada iyo ganacsiga, qiimaha cuntada lagama maarmaanka ahi waxa lagu wadaa  inaanay awoodi karin qoysaska saboolka ahi.  Colaadda sokeeye iyo burcad badeedku waxay iyana xaddidayaan awoodda dibed ka keenidda badeecadda, ganacsiga gudaha iyo fursad-u-helidda  gargaarka bina-aadamnimada.


**BEERAHA**

Baaritaanka dalagga beeraha xilliga Gu'ga ee ay sameynayaan FSAU iyo hay'adaha ay wada shaqeeyaan weli wuxuu ka socdaa koonfurta Soomaaliya, hase yeeshee, saadaasha hore waxay muujinaysaa in wax-soo-saarka beeruhu  ka fiicnaado sidii la filayay, in inkastoo wax-soo-saarka dalagga ee guud weli laga yaabo inuu caadi ka hooseeyo, kadib billowgii roobabka Gu'ga oo dib u dhacay iyo di'itaankoodii oo aan wanaagsanayn (bishii 4aad illaa bartamihii bishii 6aad) iyo waxyeelo weyn oo ka soo gaartay cayayaan,. Tan waxaa badi u sabab ah iyadoo ay goobaha qaar sida gobollada Jubbooyinka iyo Bay ay heleen roobab caadi ah, iyo iyadoo roobab hore u da'ay oo caadi ka sarreeya oo ah roobabkii Xagaagu ay ka da'een gobollada Jubbooyinka iyo qaybo ka tirsan gobollada Bay iyo Shabeellooyinka, kuwaasoo hagaajiyey  dalaga beeraha ee taagan, isla markaana abuuray fursado la xiriira beeritaanka miraha xilliga caadiga ah ka baxsan, gaar ahaan dhulka webiyada ee gobollada Jubbooyinka iyo Shabeellooyinka.

Warbixinaha horudhaca ah ee ka imanaya guduhu waxay muujinayaan in wax-soo-saarka haruurka/mesegadu laga yaabo inuu ku dhowyahay caadi gobolka Bay iyo degmada Wanla Weyn ee gobolka Shabeelada Hoose, labadaas goobood guud ahaan waa kuwa soo saara haruurka ugu badan koonfurta.  Iyagoo ka jawaabaya qiimaha dalagga ee sarreeya iyo baahida korortay, beeralayda gobolka Bay dhul badan ayay ku abuureen haruurka marka loo eego xilliyadii hore. Waxaa intaas dheer, qoysas reer magaal ahaa oo ka tegay Muqdisho una qaxay dhulka miyiga ah xilligii Gu'ga ayaa billabay inay wax beeraan, taasoo sii kordhisay dhulka wax laga beeray. Inkastoo wax-soo-saarka haruurka ee gobolka Bay la filayo inuu wanaagsanaado, haddana waxaa jira warbixino sheegay in shimbiro ay waxyeelo weyn geysteen, taasoo dhimi doontaa miraha la goosan doono.

Gobolada Shabeelooyinka gaar ahaan Shabeelada Hoose, roobab badan oo qiyaastoodu ay u dhaxayso 20mm illaa 80mm ayay heleen mud-dadii u dhaxaysay dhamaadkii bishii 5aad illaa bishii 6aad, taasoo keentay in beeralayda dhulka webiyada iyo beeraha ku baxa roobabku ay ku dhaqaaqaan inay mar dambe beeraan gallay. Tani waxay keentay in xilliga abuurka beeruhu sii dheeraaday iyo in dib loo abuuray mirihii hore loogu guulaysan waayay, taasoo kordhisay baahida loo qabo shaqaalaha beeraha.  Gaajada jirta darteed, isticmaalka gallayda cagaarani way sii fidday.  Shabeelooyinka, xilliga abuurka oo sii dheeraaday, oo ay ku jirto dib u abuurka gallaydu, wuxuu hubin doonaa inuu sii socdo isticmaalka gallayda xabuuqa ama xasiida ah labada bilood ee soo socda.  Miraha mar dambe la abuuray waxaa la goyn doonaa dhammaadka bisha 9aad illaa horraanta bisha 10aad, waxaana la filayaa in lagu xisaabtami doono galay badan oo la soo saaro  xilligan. Waqooyi Galbeed, wax-soo-saarka gallayda nooca muddada gaaban ku baxda aad ayuu u liitay goobo ah Hargeysa, Gabilay iyo Boorame roobabka Gu'ga oo liitay dartood. Wax-soo-saarka guud ee haruurka ee Soomaalilaand, waxaa la filayaa bisha 10aad/11aad, waxaana ay ku xirnaan doontaa sida ay u da'aan roobabka Karantu laga billaabo bisha 7aad.

**Jaantusta  2: Isbeddellada Qiimaha Dalagga ee Heer Gobol (ShSo)**




Qiimaha gallayda iyo haruurka koonfurta iyo gobollada dhexe waxa lagu wadaa inuu sii kordho, iyadoo horeba uu u gaadhay heerarkii u sarreeyey ee la diiwaan geliyey (Jaantusta 2). Qiimaha haruurka/mesagada dalka gudihiisa ka soo baxa wuxuu kor u dhaafay heerarka qiimaha caadiga ah ee gallayda, oo iminka ka sarreeya qiimaha 'caadiga' ah ee bariiska dibedda laga keeno ee aadka qaaliga u ah.


Qiimuhu sida caadiga ah hoos ayuu u dhacaa bisha 8aad, madd-aama dalagga xilliga gu'ga ee go'ay la soo geliyo suuqa, hase yeeshe, lama filayo inay sidani dhici doonto sannadkan. Qiimaha dalagga waxa la filayaa inuu ahaado mid sare labada bilood ee soo socda dhowr sababood dartood.  Ma jiro ama wuu yaryhay kayd dalagga ahi sababtoo ah guud ahaan wax-soo-saarka dalagga beeraha oo liitay dhowrkii xilli ee u dambeeyey, isticmaalka gal-layda xabuuqa/xasiidda ah oo aad u sarreeya iyo xilliyada abuurka is dul fuulay ama sii dheeraaday oo ay macnahoodu tahay inaanay jiri doonin hal mar oo dalagga go'ay la soo gelin doono suuqyada. Dalagga gudaha ee guud ahaan hooseeya waxaa weheliya, baahida loo qabo dalagga gudaha laga soo saaro oo si aan caadi ahayn u sarraysa sababtoo ah qiimaha dalagga dibedda laga keeno oo aad u sarreeya.  Dad ka ganacsada dalagga oo jooga Hiiraan iyo gobollada dhexe waxay billaabeen inay si toos ah dalagga uga iibsadaan Tuulooyinka, iyadoo qoysaska saboolka ahini ay ku tiirsan yihiin cuntada gargaarka ah iyo deeq ama sadaqada.

## XOOLAHA

Marka la eego roobabkii Gu'ga ee sannadkan 2008du sida ay u liiteen, xaaladaha dhul-daaqsimeedka xoola-dhaqatada ee Soomaaliya waxa lagu wadaa inay ka sii darayaan, gaar ahaan gobollada ay abaartu saamaysay ee Bakool, Hiiraan iyo gobolada dhexe. Gobollada dhexe, xaaladda jimidhka xooluhu aad ayay u liidataa, taasoo taabanaysa wax-soo-saarkooda iyo qiimahoodaba. Wararka ka imanaya guduhu waxay xaqiijinayaan inay dhinteen xoolo tirdoodu aad u sareysa oo lama filaan ah gaajo iyo cuddurro ay abaartu keentay dartood. Roob la'aanta xilliga Gu'ga oo ay weheliyeen saddex xilli oo isku xiga oo roobabku ay liiteen waxay culays sii saareen ilihii biyaha. Biyaha ceelashu ma dabooli karaan baahida jirta, iyo istimaalka badan ee lagu sameeyay qalabka matoorradda ee ceelasha biyaha waxay keentay in ay xumaato shaqeyntii ceelashu. Waxaa kale oo kordhay qiimaha shidaalka lagu isticmaalo matoorrada iyo qiimaha biyaha la dhaamiyo. Fuustada qaadda 200 oo litir oo biyo ah iibkeedu wuxuu noqon karaa lacag u dhaxaysa ShSo 30,000 illaa 50,000, iyo illaa ShSh 100,000 marka biyaha meelo fog laga soo qaado. Si loogu ogolaado in daaqu uu dib u soo cusboonaado si ay dad gaar ahi u isticmaalaan, siyaasad cusub oo dhulka 'lagu ceshanayo ama xidhanayo' si sharci darro ah ayaa laga soo sheegay inay ka jirto qaybo ka tirsan gobollada dhexe. Tani waxay keeni kartaa inay kororto colaadda ku salaysan khayraadka dabiiciga ah ee ka dhaxaysa qabaa'ilka.

Biyaha iyo daaqa oo aad u yaraaday waxay keeneen in dad iyo xoolo badani ay guuraan – taasoo saamaynaysa 50% degaannada miyiga – kuwaas oo hadda isugu ururay dhulka biyaha joogtada ah leh. Ilaha daaqa iyo biyuhu lagama yaabo inay ku fillaadaan xoola-dhaqatada illaa bisha 10aad. Xaaladda jimidhka xoolaha oo sii xumaanaysa darteed, xoola-dhaqatadu ma haysato xoolo jar/ahmin ah oo ay iibiyaan, sidaas darteed kama faa'iidaysan doonaan wakhtiyada suuqgeynta xooluhu ay ugu sarraysay ee Ramadaanta oo ku dhici doonta bisha 9aad iyo Xajka oo ku beegan bisha 11aad. Qiimaha cuntada ee kor u kacday iyo hoos u dhaca tirada xoolaha iibka geli karaa waxa lagu wadaa inay culays ku hayaan awoodda qoysaska xoola-dhaqatada ahi ay ku fulin karaan baahidooda dhinaca qiimaha cuntada, balka, biyaha iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka ah sida daawada xoolaha iyo kharashka gaadiidka (Jaantusta 3). Gobollada Hiiraan iyo Bakool, biyo iyo daaq la'aan ayaa ku qasabtey xoola-dhaqatadu in ay iibiyaan xoolaha dhaqanka loo haysto si ay u daboolaan kharashka qiimaha sare ee cuntada, balka iyo biyaha. Marka ay iibiyaan xoolaha dhaqanka u haystaan, xoola-dhaqatadu waxay halis ugu jiraan inay yaraadaan tirada xooluhu sidaas darteedna waxaa halis galaysa hubinta hab-nololeedkooda ugu muhiimsan.

**Jaantusta 3: Isbeddellada Isweydaarsiga Ganacsiga ee Dalag Lagu Bedelanayo Ri**





Waqooyiga Gedo waxaa jooga tiro badan oo ah xoola-dhaqato ka soo guuray degmooyinkan Liibaan iyo Afdheer ee Itoobiya abaarta darteed, taasoo keentay in xoolo badani ay isugu soo uruureen goobtaas, taasoo keenaysa in dhulkaas si degdeg ah u xaalufo. Gobollada Jubbada Hoose iyo Dhexe, inkastoo xaaladaha biyaha iyo daaqu ay guud ahaan wanaagsan yihiin, haddana waxaa jira guuritaan aan caadi ahay oo lagaga soo guuray gobolka Gedo oo keenay in si weyn tartan loogu jiro khayraadka dabiiciga ah iyo suuqyada. Haddii ay hore biyuhu uga dhammaadaan dhulka miyiga ah taasi waxay keeni doontaa in si aan caadi ahayn loogu guuro dhulka webiyada, taas oo keeni karta iska hor imaad dhex mara xoola-raacatada iyo beeralayda goobahaas. Intaas waxaa dheer joogitaanka xoolaha ee meelaha leh gendiga dhulka webiyada (gosha) ilaa laga gaaro xilliga roobka oo dhamaadka bisha Oktoober waxayna kor u qaadeysaa iney dhacaan cudurada xoolaha taasoo sababeysa qiimo sare ee daaweeyn ah. Walaac cusub ayaa ka soo ifbaxaya meelo dhulka daaqsinka wanaagsan ah ee gobolada Sool, Sanaag iyo Nugaal ee gobolada waqooyi i mar haddii biyo iyo daaqii ay hoos usii dhacayaan roobabka oo liitey awgeed. Biyo dhaamis xilligii caadiga ahaa ka soo hor maray iyo guuritaan aan caadi ahayn oo u jeeda dhinaca ceelasha biyaha ayaa laga soo sheegay goobahaas. Inkastoo ay korortay tirada xoolaha dibedda loo dhoofiyey, qiimaha xooluhuna uu sarreeyo tan iyo bishii 6aad ee lasoo dhaafay, haddana tani ma kabayso kharashka kordhay ee cuntada, cowska iyo biyaha. Tusaale ahaan magaalada Burco, isweydaarsiga ganacsiga ee ka dhexeeya dalagga iyo **ridu** hoos wuxuu uga soo dhacay 47kg oo dalaga ah oo la waydaarsanayo halkii neef oo ri ah bishii 6aad ee 2007 waxana uu noqday 22kg/halkii neef ee ri ah bishii 6aad ee sanadkan 2008. Sidoo kale, qiimaha geelu hoos wuxuu uga soo dhacay Doolarka Markaykanka 319/ halkii neef ee geel ah waxana uu noqdey Doolarka Maraykanka $207/halkii neef ee geel ah.


## SUUQYADA IYO GANACSIGA

Qiime dhaca sii socda ee Shilinka Soomaaliga wuxuu si weyn u saameeyey dhammaan qaybaha bulshada ee koonfurta, gobollada dhexe iyo waqooyi-bari, goobahaas oo lacagta ugu muhiisan ee laga isticmaalaa ay tahay Shillinka Soomaliga taasoo keentay inuu si weyn u kordho qiimaha badeecadda dibadda laga keeno. Tan iyo bishii 1aad ee 2007, celceliska qiimaha sarifka Shillinka Soomaliga marka loo eego Doolarka Maraykanku ee dhulka uu haruurka/mesegadda ugu badani ka baxo, Shabeellooyinka, Jubbooyinka, waqooyi bari iyo gobollada dhexe wuxuu kor uga kacay ShSo13,629 isagoo gaaray ShSo 35,477, kor u kacaas oo ka dhigan 160% (Jaantusta 4). Suuqa baakaaraha ee Muqdisho oo kaliya, heerka sarrifka lacagtu wuxuu kordhay 42% iyadoo uu ka qiimo dhacay ShSo 22,725 halkii Doolarka Markaykanka ahi bishii 1aad ee sannadkan 2008 uuna gaaray ShSo 32,240 halkii Doolar maraykanka ahi bishii 6aad. Suuqyada kale ee laga isticmaalo ShillinkaSoomaaliga waxaa iyana laga soo sheegay heerar kan la mid ah oo qiime dhac ah.

**Jaantusta 4: Heerka Sarrifka Lacagta ee Bishii –ShSo iyo ShSl marka loo eego Doolarka Maraykanka**



**Jaantusta 5: Gobollada dhexe: Qiimaha Badeecadda Dibedda Laga Keeno oo Loo Eegayo Sarifka lacagaha**




Qiime dhaca Shilinka Soomaaliga iyo qiimaha sare ee cuntada iyo shiidaalka ee heerka caalamiga ahi waxay keeneen in qiimaha badeecadda dibedda laga keenaa uu aad u kordhay. Bariiska ayaa ka mid ah badeecadda qiimahoodu uu aadka u kacay, iyadoo celceliska qiimaha bariiska ee waqooyi-bari, gobollada dhexe iyo koonfurtu uu kordhay in ka badan 200% isagoo ka kacay ShSo 14,570/kg bishii 1aad ee 2008, gaarayna ShSo 43,770/kg bishii 6aad. Xitaa Soomaalilaand oo lacagta laga isticmaalo ee koowaad ay tahay Shilinka Soomaalilaand, oo qiimaha suuqyaduna uu ka xasilloon yahay kuwa kale, qiimaha bariisku aad ayuu u sarreeyay iyadoo uu qiimuhu kordhay 85% intii u dhaxaysay bishii 1aad iyo bishii 6aad ee 2008 (eeg Warbixinta Xogta Suuqyda ee FSAU ee bishii 7aad ee 2008). Waxaa kale oo si weyn u kordhay qiimaha shidaalka. Gobollada dhexe, qiimaha shidaalku wuxuu kor uga kacey ShSo 16,250 halkii litir bishii 1aad ee 2008 waxaana uu gaaray ShSo 30,000 halkii litir bishii la soo dhaafay, qiime kororkaas oo ka dhigan 77%. Qiimaha shiidaalka ee aadka u kacay wuxuu uga sii daray saamaynta abaartu ay ku leedahay gobollada dhexe isagoo si weyn u kordhiyey qiimaha biyaha iyo cuntada (Jaantusta 5). Sidoo kale, saamaynta uu shiidaalku ku leeyahay kharashka gaadiidka ee kor u kacay waxay si dhib leh u taabanaysaa dhammaan gobollada, taasoo keenaysa inuu sii kordho qiimaha badeecadda kale. Dhammaan qiimaha badeecadda la soo dhoofiyo aad ayay u korodhay sannadkii la soo dhaafay, taasoo ay ku jiraan cuntooyinka lagama maarmaanka ah ee sida saliidda cuntada iyo sonkorta 2008 (eeg Warbixinta Xogta Suuqyda ee FSAU ee bishii 7aad ee 2008).

**NAFAQADA**

Natiijooyinka ka soo baxay qiimayno nafaqada ah oo dhowaan la sameeyey waxay muujinayaan heerar **Halis ah** oo ah nafaqa-darro xun oo ka jirta dhammaan koonfurta, gobollada dhexe iyo dadka ku barakacsan gobollada waqooyi-bari ee Soomaaliya. Seddex iyo toban daraasadood oo nafaqada ah oo la sameeyey sannadkan, 11 ka mid ahi waxay sheegeen in nafoqo-darro xun oo ka sarraysay 15% heerka gurmadka, lix qiimaynood waxay sheegeen heerar ka sarreeya 20% (gobollada Gedo, Bakool iyo dadka ku barakacsan Galkacayo iyo Garoowe). Tirooyinkaasi waxa lagu wadaa inay tilmaamayaan nuglaanta dadweynaha gaar ahaan dadka soo barakacay. Xataa goobaha heerarka nafaqo-darradu ay ka hooseeyaan 15%, heerarka nafoqo-darrada aadka u xun iyo heerarka dhimashadu wali way sarreeyaan (degmada Cadalle ee Shabeelada Dhexe iyo dhulka webiyada ee Shabeelooyinka).

Marka la barbar dhigo daraasadihii ugu dambeeyey ee la sameeyay, badi goobahaasi may muujin isbeddel weyn, marka laga reebo gobolka Bakool oo qiimayn ay magaalada Waajid hay'adda ACF ka samaysay iyo qiimayn degmada Ceel-berde ay hay'adaha FSAU/IMC ka sameeyeyn ay muujiyeen in xaaladdu ay aad uga sii dartay. Arrimaha kale ee walaaca keenaya waxaa weeye heerarka tallaalka jadeecada ee dadka la qiimeeyey oo hooseeya, helitaanka biyo dhawrsoon oo yar, iyo la'aanta adeegyada faya-dhowrka iyo caafimaadka. Dhammaan arrimahaasi waxay dhimayaan adkaysiga xagga nafaqada ee dadkaasi haddii ay la ku yimaadaan carqalado..

Saamaynta qiimaha cuntada ee kacay waxay ka muuqataa tirada sii kordhaysa ee carruurta ay nafaqo-darro aad u xumi hayso ee jooga magaalooyinka sida Muqdisho, Afgooye, Waajid, Galkacayo, Belet-weyne iyo Baydhabo. ACF oo ah hay'ad Faransiis ah oo aan dawli ahayn oo maamusha xarrumo quudinta iyo nafa-qaynta ah oo ku yaalla magaalooyinka Waajid iyo Muqdisho waxay sheegtey in tirada carruurta la geeyo xarrumaha quudinta ee nafaqo-darro aad u xumi ay haysaa ay aad u kordheen 3dii billood ee la soo dhaafay dhammaan saddexda magaalo ee hore loo soo sheegay. Hase yeeshee, walaaca ugu badan waxa laga qabaa Dhusomareeb, gobolka Galgaduud, oo xarumaha quudinta ee carruurta ay nafaoqa-darro aad u xumi hayso la geeyo oo ay maamusho hay'adda ACF, tirada carruurta la geeyey saddexdii bilood ee la soo dhaafay way ka badanayd laban-laab sida caadiga ahayd. Tani waxay si dheeraad ah u muujinaysaa dhibaatada ka timi abaarta xun ee ka jirta gobollada dhexe. Hase yeeshee, isbeddellada tirada sii kordhaysa ee carruurta ay nafaqo-darro aad u xumi hayso maaha mid ay ka siman yihiin dhammaan qaybaha bulshada koonfurta iyo gobollada dhexe, iyadoo tirooyin heerarkoodu ay xasilloon yihiin laga soo sheegayo gobollada Jubbooyinka iyo qaybaha dhulka miyiga ee gobolka Bay tilmaamayaasha hubinta cuntadu ay wanaagsan yihiin marka goobaha kale loo eego. Walaaca ugu weyn waxaa iminka laga qabaa, jawiga ay hay'adaha gargaarka bina-aadamnimadu ay fursad-ugu-heli karaan goobaha sida xun dhibtu u saamaysay oo sii yaraanaya. Daaweynta carruurta ay nafaqo-darrada aadka u xumi haysaa waxay u baahan tahay daryeel caafimaad oo aqoon gaar ah u baahan, laakiin awoodda ay hay'adaha garaarku ku bixin karaan daryeelkaasi si degdeg ah ayay u sii yaraanaysaa, taasoo sii kordhinaysa halista ku imanaysa in carruurtaasi ay dhintaan.

**Warbixinaha iyo War Saxaafadeedyada Dhawaan Soo Baxay ama Soo Bixi Doona**

*Warbixinta Xogta Suuqyada ee FSAU/FEWSNET , Bisha 7aad ee 2008*
*Warbixinta Xogta Cimilada ee FSAU/FEWSNET , Bisha 7aad ee 2008*
*Warbixinta Bishii ee Nafaqo ee FSAU , Bisha 1aad ee 2008*
*Warbixinta Taxanaha Farsamada ee FSAUee Falanqaynta Deyrta '07/08 Kadib, Bisha 3aad ee 2008*

***XUSID:*** *Warbixinaha iyo war saxaafadeedka kor ku xusan waxa laga helayaa websaytka FSAU: www.fsausomali.org*

Technical & Managerial Support
European Commision
USAID
Sida
FEWS NET
unicef
Funding Agencies